



## Xaaladaha Deg-degta ee Waqtiga Barafka

Waqtiga uu barafku da'ayo, dadka deggan waxaa waajib ku ah in ay baabuurta oo dhan ka qaadaan waddooyinka, meelaha baabuurta la dhigto, dariiqyada yar-yar iyo Dhinacyada Baabuurta la Dhigto ee Dowlad Hoosaadka magaalada Hopkins. Xaalad deg-deg ah oo baraf ayaa lagu dhawaaqi karaa marka labo inji oo baraf ah uu da'o. Xaddidaadaha baabuur dhigashadu waxay sii ahaaneysaa mid jirta ilaa barafka dhinacyada waddada laga qaadayo, isla markaana meelaha baabuurta la dhigto iyo Dhinacyada Waddooyinka Magaalada si buuxda looga xaaqayo.

Dheerar-hoosaadka barafka waxaa lagu cabbiraa Hopkins waxaana laga yaabaa ineysan mar walba la mid noqon dheerar-hoosaadka barafka laga soo sheego Gegida Diyaaradaha Caalamiga ah ee Minneapolis-St. Paul. Xaaladaha deg-degta barafka ee Hopkins waxaa looga dhawaaqaa **Khadka Barafka Hopkins, 952-939-1399**, waxaana sidoo kale hawada laga laliyaa Maxaadada Telefishoonka Bulshada Hopkins ee Channel 16.

Saxaafadda deegaanka, oo ay ku jiraan raadiyaha WCCO-AM iyo Telefishinka WCCO-TV ayaa la ogeysiinayaa xaaladaha deg-degta barafka ee Hopkins; si kastaba, saldhigyadu hubaal kama dhigayaan baahinta ku dhawaaqidda xaaladda. Marka uu shaki jiro, dadka deggan waa in ay mar walba soo wacaan Khadka Barafka.

Haddii xaalad baraf oo deg-deg ah looga dhawaaqo Hopkins waqtiga galabtii ama waqti hore oo fiidkii ah, **shaqaalaha Shaqooyinka Dadweynuhu waxay billaabi karayaan in ay barafka xaaqaan waqti yar ka dib saqda dhexe habeenkii, iyadoo la meel marinayo sharciga tikid siinta iyo jiididda baabuurta wixii ka billowda 10-ka habeenimo.** Xaaladaha deg-degta ee barafka ee lagu dhawaaqo wixii ka danbeeya 10-ka habeenimo waxay keeni karayaan in hawsha tikid siinta iyo jiididda baabuurta ay billaabato 8-da subaxnimo ee maalinta ku xigta. Si aad isaga ilaaliso in baabuurka lagaa jiid, dadka deggan waa in ay waddooyinka iyo meelaha baabuurta la dhigto ee Magaalada sida ugu dhakhsaha badan uga qaadaan baabuurta marka lagu dhawaaqo xaalad deg-deg ah oo baraf.



## Magaalada Hopkins Waaxda Shaqooyinka Dadweynaha

11100 Excelsior Boulevard  
Hopkins, MN 55343

952-939-1382  
952-939-1381 (Faakis)

[www.hopkinsmn.com](http://www.hopkinsmn.com)

Magaalada Hopkins • Waaxda Shaqooyinka Dadweynaha



**Khadka Barafka Hopkins  
952-939-1399**

# Buugga yar ee Qormada Barafka

**Tusiyahaaga ku  
aaddan Barafka**

## Saxaaradaha Qashinka & Waxyaabaha dib Loo Warshadeyn karo

Ururinta qashinka iyo waxyaabaha dib looga warshadeynaya magaalada Hopkins waxay u baahan yihiin u banneyn ugu yaraan 4 fiit oo dhulka saxaaradda ku hareereysan ah. Mararka qaarkood meel ayaa barafka looga xaaraa si meel saxaaradda laga dhigo loogu sameeyo, laakiin taasi ma oggolaaneyso meel ku filan oo gacanta baabuurku ay ka gaarto saxaaradda. Inkasta oo dariiqyada iyo luuqyadu ay cidhiidhi ahaan karaan barafka meesha ku ururay awgeed, haddana waxaa muhiim sii ah in banneynta hareeraha saxaaradda sideeda loo wado.


## Sanaadiiqda Waraaqaha

Sanaadiiqda waraaqaha ee waxyeellooba waqtiga barafka meesha laga xaaqayo Magaaladu ma beddeli doonto in daliil waxyeello oo ka dul muuqata oo ah in baabuurta Magaalada ee barafka xaaqaya aygeysteen

## Mee Baabuurkeygu? Dib U Dalbashada Baabuurka Laga Jiito Dariiqyada iyo Meelaha Kale ee La Dhigto

Baabuurta lagaga tago waddooyinka ama meelaha baabuurta la dhigto ee dadweynaha waqtiga xaaladaha deg-degta ee barafka waxaa laga yaabaa in tikidh la siiyo ka dibna la jiido (Xeerka Magaalada Hopkins ee 1305.31 iyo 1305.32).

Haddii baabuurka lagaa jiido, waxaad wacataa habka makiinadda dadka la hadashada ee 952-949-2385 si aad u baratid sida, goorta iyo meesha aad baabuurkaaga ka soo qaadaneyso. Baabuurta waxaa la siinayaa milkiileyaasha ku qoran. Milkiileyaasha waxaa looga baahan yahay in ay keenaan caddaynta lahaanshaha, caddaynta caymiska iyo leysan aan dhacsaneyn ee baabuur wadid ka hor inta aan baabuurtooda la siin. Lacag bixinta waxaa lagu oggolaanayaa mid caddaan ah, kaararka Visa ama MasterCard. Jeeg shakhsi ahaaneed lama oggolaan doono.



uu jiro mooyaane. Haddii Magaaladu ay qalad gasho, sanduuqa waraaqaha waxaa lagu beddeli doonaa sanduuq tayo ahaan u dhigma. Sidoo kale Magaaladu mas'uul kama aha sanaadiiqda waraaqaha ee uu barafka culeyskiisu soo rujiyey.

## Dhinacyada waddada ee lagu socdo

Waqtiga qaboobaha, waa hawl u taal dadka ka ganacsada iyo kuwa deggan Hopkins iney barafka ka xaaqaan meelaha dadweynuhu ku socdaan. Xataa baraf yar oo da'a (oo ka yar labo inji) wuxuu halis u keeni karaa ammaanka dadka isku dayaya in ay ku socdaan dhinacyada waddada.

Xeerka Magaalada Hopkins ee 820.03 wuxuu milkiilaha iyo/ama qofka deggan guriga leh meel dadweynuhu ku socdaan uga baahan yahay in ay barafka uga xaaqaan muddo 12 saacadood gudahooda ah marka uu baraf da' o. Tani waxay lagama maarmaan u tahay in la xaqiijiyo ammaanka dadka isticmaalaya dhinacyada waddada ee la maro. Sharcigaan waa la meel marinayaa. Haddii baraf iyo barafka dhalada noqda aan meesha looga saarin muddo 24 saacadood gudahooda ah, shaqaalaha

Baabuurta loo soo jiiday xaalad deg-deg ah oo baraf waxaa la dhigaa Matt's Auto Service, 6282 Industrial Dr, Eden Prairie. Xafiska guur-guura in uu ku yaallo meesha baabuurta la geeyey awgeed, ayaa macaamiishu waxay baabuurtooda ka soo qaadan karaan oo lacagtana ku bixin karaan meesha baabuurta la geeyey. (Haddii baabuurkaaga loo jiiday sabab aan la xiriirin baraf, wac 952-949-0200 si aad macluumaad uga heshid.)

## Lacagaha Ugu Yar ee Baabuur Jiidda la Isaga Qaado

Jiidda caadiga ah oo isla maalintiiba la soo qaadanayo baabuurka.....\$110

Baabuurta taraagyada aan waaweyneyn oo isla maalintiiba la soo qaadanayo.....\$120

Maalin kasta oo ay sii yaallaana waxaa ku soconaysa .....\$ 30

Qiimaha kaydintu wuxuu ku dhabqamayaa maalinta la jiiday iyo maalmaha ka danbeeya.

Magaalada ayaa xaaqi doona adigana si waafaqsan ayaa lacagteeda lagaaga qaadi doonaa:

## Ganacsiyada

- \$2 halkii fuut 30 fuut ee dhinacyada lagu socdo
- \$1 halkii fuut 30-100 fuut ee ku xiga ee dhinacyada lagu socdo
- 50¢ halkii fuut inta fiit ee soo hartay ee dhinacyada lagu socdo

## Dadka deggan

- \$1 halkii fuut 50 fiit ee ugu horreeya ee dhinacyada lagu socdo
- 50¢ halkii fuut inta soo hartay ee dhinacyada lagu socdo

Si aad u soo sheegto waddo dhinaceed u baahan in loo feejignaado, fadlan soo wac Waaxda Injineerinka ee ku taalla Masraxa Magaalada 952-935-8474. 🍎

## Baabuur Dhigashada Xaaladda Deg-degta Barafka



### Bartamaha Hopkins

- Meesha Baabuurta la dhigto ee magaalada 300 ee waqooyiga ka xigta Baabuur Dhigashada Downtown ee ku taalla 9th Avenue S
- Baabuur dhigashada Maetzold Field ee laga soo geli karo 1st Street N

### Koonfurta Hopkins

- Bariga 9th Avenue S iyo waqooyiga West-brooke Way inta u dhexeysa 9th Avenue S iyo Nine Mile Creek
- Meesha ugu danbeysa bariga ee 8th Street S ee u dhow Valley Park

